

BANDHIGGA CALANKA

Gudiga Waxbarashada waxay aaminsan yihiin in calanka Maraykanka uu astaan u yahay qiimaha qarankeena, fikradaha ku duugan dastuurkeena iyo ruuxa nooleeyo Degmadeena.

Degmada waa in ay soo iibsataa calanka Maraykanka, alaabta calanka iyo qalabka lagama maarmaanka u ah in lagu dhajiyo dhismaha dugsi kasto ama agtiisa. Waa in calan lagu dhejiyaa qolka shirarka ee dugsi kasto.

Calanka waa in loo suraa si buuxdo ama haaf ah sida waafaqsan sharciga. Intaas waxaa dheer, calanka waxaa laga yaabaa in loo dajiyo haaf si loo xuso geerida xubin hada dhacday ama mar hore ee gudiga, shaqaale ama arday hada. Marka uu dhinto shaqsiga sidaas loo xuso, calanka Mareykanka waxaa loo soo dajinayaa haaf maalinta duugitaanka shaqaalaha ama ardayga ee dugsiga ama xarunta Degmada ee qofkaas oo ka tirsanaa iyo Xafiiska Dhexe.

Iyadoo la raacaayo sharciga qaranka iyo kan gobolka, xeerarka, iyo siyaasadaan, Kormeeraha Guud ee Dugsiyada waa inuu soo saaraa xeerar iyo nidaam maamuleed haboon, daryeelo iyo dhajiyo calanka.

Tixraac aan Suritaanka Xeerka Calanka (4311.1-R)
toos aheyn:

Tixraac: 4 U.S.C. §§5-9 (suritaanka calanka)
 Sharciga Waxbarashada §§418; 419; 420 (shuruudaha dugsiga in uu soo iibsado,
 soo bandhigo iyo hormariyo xeerarka iyo nidaam ku saabsan daryeelka iyo ilaalinta
 calanka)
 Sharciga Fulinta §§400-403 (xeerarka suritaanka calanka)
 8 NYCRR Qaybta 108 (xeerarka calanka)

Xasuus Siyaasadii hore, Buuga Siyaasada, Hoos u dhigida Calanka Marka uu Shaqaale
qoraal: Geeriyoodo (October 18, 1991), Dib loo eegay August 20, 1998; Wax laga bedelay
 January 26, 2023 iyadoo la raacayo Qaraarka No. 2022-23: 438; Dib loo eegay Juun
 26, 2025 iyadoo wax laga bedelin sida waafaqsan Qaraarka No. 2024-25: 884

ct/sg